

Shilalkaanu waa kuwo si dhib yar laysaga ilaalin karo. In la qaato go'aan ah in ayada oo laki th sarqaansanyahay aan gaari lawadindu waxay badbaadin kartaa nafyaal badan.

- Khamro ha cabbin haddii aad ogtahay in aad u baahan doontid in aad baabuur wadid hadhow.
- Haddii aad qorshaynaysid in aad cabtid khamro, waqti hore diyaarso sidii aad guriga kutagi lahayd.
- Qof aan sarqaansanayn ka codso in uu baabuur kugu geeyo guriga.
- Kawaani saaxiibadaada iyo faamilkaaga in ay gaari wadaan ayaga oo sarqaansan.
- Ha u ogolaan naftaada ama caruurtaada in uu darawal sarqaansanu gaari kuwado.

Waligaa Carruurta Gaariga Ha Uga Dhextagin Kaligood

In carruurta Kaligood gaariga loogaga dhextago ama in loogaga tago carruurta baabuur furan agtooda waxay noqon kartaa mid aad khatar u ah.

- Carruurta way kudhexguban karaan gawaarida si aad u dhakhso badan. In kuleel darti loo dhinto waa sababta ugu badan ee keenta dhimashooyinka-gaariga laxiriira ee carruurta da'doodu kahoosayso 14 waana mid si gooni ah khatar u ah kulaylka Arizona.
- Ha uga dhextagin carruurta gaari matoorkiisu daaranyahay ama gaari furuhu kujiro. Tani waxay keeni kartaa shil ah in gaarigu taraaraxo asaga oo ilmahaagii kudhexjiro.
- Ilmihii looga agtago gawaari aan xirnaynu waxay iskuxiri karaan gaariga dhexdiisa ama gaariga dabadiisa, taas oo keeni karta in ay kugubtaan ama neeftu kudhegto.

Shilalkaan si sahal ah ayaa la isaga ilaalin karaa.

- Waligaa ilmahaaga kaligi ha uga dhextagin gaariga, sidaad rabto u damacsanow in aad dhakhso ugu soo laabatid haddaa doonto.
- Waligaa hakatagin matoorkaaga oo shidan ama furahaaga ha ugatagin gaariga dhexdiisa.
- Ugatag alaabta muhiimka ah sida telefoonka, buursada jeebka, ama shandaddaada ilmaha hurda agtiisa si aadan u ilaawin in ay meesha joogaan.
- Bar ilmahaaga in aysan kuciyaarin gudaha, hoosta ama agagaarka gawaarida.
- Haddii aad ilmo kudhex aragtig gaari xiran waxaad wacdaa 9-1-1.

Gudbidda Jidka

Waxaa kale oo muhiim ah in aad ahaatid mid badqaba baabuurta agtooda xattaa haddii aadan ahayn mid gaari wada. Bar faamilkaaga sida si badqab ah loo gooyo jidka xaqiijina in aad in aad u horkacdid dabiicadahaan.

- Kahor inta aadan goyn jidka iska fiiri midig iyo bidix baabuurta kasoo socota.
- Jidka ka goo meelaha loogu talagalay in laga gooyo kaliya.
- Bar Carruurta yaryar in aysan goyn jidka ayaga oo aan haysan gacanta qof weyn oo lagu kalsoonyahay.
- Is ilaali baarkinada iyo jidadka dhexdooda.



Ku Badbaadidda Gawaarida agtooda



Barnaamijka Caafimaadka Qaxootiga
Waaxda Arizona ee Adeegyada Caafimaadka

U hogaansan Sharciyada Taraafikada

Mid kamid qaababka ugu fudud ee hoos loogu dhigi karo khatarta in aad dhaawacantid marka aad baabuurka wadaysid waa in aad u hogaansantid sharciyada taraafikada aadna sida ugu deggan ee macquulka ah uwadid gaariga.

- Follow the speed limit.
- Stop at red lights and stop signs.
- Avoid distractions while driving.
- Do not follow too closely behind the car in front of you.

Isticmaal Suumanka Kursiga

Xataa haddii aad si deggan u wadid gaariga, waxaa marwalba macquul ah in uu shil dhaco. Waa muhiim in aad digtoontahay, mid kamid ah qaababka ugu fiican ee aad u digtoonataana waa in aad marwalba xirato suunka kursiga marka aad gaariga wadaysid. Tani waa mid muhiim ah waayo:

- Suumanka kuraasto kumanaan nafood ayay badbaadiyaan sanad kasta.
- Suumanka kuraastu waxay aad udhimaan dhaawacyada kusoo gaari kara marka uu dhaco shil gaari.
- Arizona dhexdeeda, waa sharci in aad xiratid suunka kursiga. Haddii adiga ama mid kamid ah rakaabkaagu aysan xirnayn suumanka kuraasta, waa in aad bixisid ganaax.

Waxaa kale oo muhiim ah in aad hubisid in aad suunkaaga u xirantahay si wanaagsan.

- Suunka kursigu waa in uu sinahaaga kugudubsanyahay suunka garabkuna waa xabadkaaga dhex maro.
- Haku xiran suunka garabka gacantaada hoosteeda, dhabarkaaga gadaashiisa ama luquntaada gudubkeeda. Tanu waxay sababi kartaa dhaawac halis ah haddii aad shil gashid.
- Waa in uusan suunku lahayn wax duuduub ah. Xaqiiji in aysan caruurta kuciyaarin suumankooda kursiga ama ay duuduub uyeelaan.

Badqabka Kursiga Gaariga

ciyaalka aadka uyaryar ee aan isticmaali karin suunka kursiga caadiga ah waa in laguridaa kursi gaari oo ku habboon. In aad udoortid kursiga gaariga ee saxda ah waa mid aad muhiim ugu ah badqabka ilmahaaga.

- Waa halis in la isticmaalo kursi gaari khalad ah. Xaqiiji in kursigaaga gaarigu yahay mid loo sameeyey ilmahaaga da'diisa, dhererkiisa, iyo miisaankiisa.
- Marka loo fiirsho sharciga Arizona, dhammaan carruurta kayaryar 8 kana gaaban 4'9" waa in lagashaa kursi gaari ama kursi kaalmeeye ah.
- Isticmaal khariiradda midigta kutaal si aad u ogaatid nooca kursiga ilmaagu u baahanyahay.

Marka aad heshid kursiga gaariga ee saxda ah, Waxaa muhiim ah in aad si wanaagsan urakibtid Aadna ilmahaaga siwacan ugu fariisid.

- Hubi in suumanku si istereex leh ilmahaaga xabadkiisa u hayaan.
- Hubi in suunka meesha layska gasho iyo ay meesha ay iska galaan sifiican uxirantahay.
- Haddii aadan hubin sida loo isticmaalo kursiga gaariga, waydii hay'addaada dibudajinta in ay kucaawiso iyo dhaqalayn dheeraad ah.

Waligaa Gaari Hawadin Adoosarqaansan

Waditaanka gaariga kadib marka aad khamri cabtid ama aad isticmaashid daroogo waa mid aan waligeedba ammaanku kujirin waxayna kugalin kartaa adiga, rakaabkaaga, iyo darawallada kaleba khatar dhaawac halis ah.

- Boqollaal qof baa sanad kasta u dhinta waditaanka ayadoo la sarqaansanyahay baabuurta lawado darteed.
- Waditaanka baaburka adiga oo sarqaansanu waa sharci darro waxayna keentaa ganaax iyo waqti xabsi.

Da'da

1	Kursiga gaariga ee gadaale			
2		Kursiga gaariga ee horey u jeeda		
3				
4				
5			Kursiga caruurta	
6				
7				
8			Suunka Kursiga	
9				
10				
11				
12				
13				

